



Cashuur Celis ma ku dalbankaraa ilmo aan masuul ka ahayn?


Can I Claim a Child on My Tax Return?

In aad ilmo lacag ama dakhli ku dalbato waxay yaraynaysaa cashuurtaad iyo wiliba in lacag la gu soo celiyo. Waxa aad dalban kartaa waxa loo yaqaano “ilmaha xaqa u yeeshay” “qualifying child” ama kuwa loo yaqaano ee qualifying relative” waa” qaraabada xaqa dalbashada u yeelatay” oo wili madax banaanaan. Waxa loo yaqaano “ilmaha xaqa u yeeshay” “qualifying child” waxa kale oo uu dalban karaa waxa loo yaqaano EITC (Earned Income Tax Credit) waxaana jirta 3 hab oo in aad wax ku dalbato ilmo ay cashuurtaada kaaga kaalmaynayaan.

- Ilmaha aad masuulka ka tahaywaxa aad ku dalbankartaa in lagaa yareeyo cashuurta lagaa jaro.
- Waxa kale oo aad ku darsami kartaa dadka cashuurta yar laga qaado.
- Waxa kale oo aad dalbankartaa waxa loo yaqaan(EITC)

Hadaba waxa jira hab sharci oo loomaro dalbashada cashuurahan. Waana in aad sharciga raado. Hadii aad raaci waydo, waxa aad waayaysaa waxa xaqa aad ugu yeelan karto in aad kiis uga dhigato EITC mustaqbalka (right to file), ama lagaa dalbado inaad u soo celiso dowlada ama IRS lacagtii aad dalbatay iyo cashuur dheeraad ah iyo wiliba ganaax. Waxyaabaha kan qaarkoo aad bay isugu murugsanyihiin.

Waxa aad heli kartaa kaalmo dhinaca cashuurta ah waa hadii aad tahay gof dakhligiisu yar yahay ama qof da’wayn ama qof naafo ah. Si aad kaalmo agtaada uga hesho, la soo hadal (651) 297-3724 ama First Call for Help statewide First Call for statewide 211, (ama (651) 291-0211 from a cell phone). First Call for Help waxa kale ee uu kaa kaalmayn karaa dhinaca luqada ama afcelinta iyo turjumaadaba



Qofkale ku dalbashada Cashuur celis

Waxa jira laba siyood oo qofkale cashuur celis lagu dalbankaro. Tan koowaad waa waxa loo yaqaan “ilmaha xaqa u yeeshay” iyo “ qaraabada xaqa u yeelatay”

Ilmaha xaqa u yeeshay

- Waa ilmaha uu dhalay qofka cashuurta bixinayaa (taxpayer’s child), ilmaha aa adigu dhalin, ilmaha aad adigu soo korisay ee lagu dhiibtay (eligible foster child) ee dawladu kuu

dhiibatay ama maxkamadi kuu ogolaatay walaalkaa,walaashaa, ilmaha ay dhaleen ama kuwa ka soo farcamay mid qaraabadaa ka mid ah. Waxaana kuwaa ka mid noqonaya kuw cashuurta bixiyaa (taxpayer for adoption) ee sida rasmiga ah loogu wareejiyo ilmo, xitaa yuusamba noqonin arinku kama dambaystiiba. (An eligible foster child) waa ilmaho kasta oo loo dhiibtay (taxpayer) qofka cashuurta bixiya oo ay u dhiibtay qof loo ogolyahay hay'adi ama maxkamadi

- Hadaba waxa shardi ah in ilmohu la nool yahay **cashuur bixiyaha 6 billod in ka badan sanadkaas** oo uu ku noolyahay US. Iskuulka oo laga maqnaado mudo qaaban, dalxiis, daryeel caafimaad, tababar military, xabsi jeelka lagu geeyo waxay xisaabsanyihiin in aad wadanka ku noolayd. Waxa la ogolyahay oo laga soo reebay waalidka aan caruurta la noolaan mudo ka badan 6 bilood si ay ugu dalbadaan si ilmo wili gacantooda ku jira oo ay ka mas'uul yihiin oo ay ku dalbadaan gunada ama dakhliga caruurta ee loo yaqaano (child tax credit). Suurto galintani ma khusayso qofka mas'uuliyada guriga haya ee buuxinaya arinkan ama kuwa ay khusayso wax loo yaqaano (the Earned Income Credit (EITC)).
- Ilmuhu waa in uu ka yaraado qofka cashuurta bixiya (taxpayer) hadii aanay naafo jooqto ah qabin (permanently and totally disabled). Waxaana jira da'o kala duwan oo xadidaya gunnada ama dakhliga (credits):
 - **Credit for Child and Dependent Care Expenses** – Waxa kale oo shardi ah in Ilmaho ka yaryahay qofka masuulka cashuur celista ama dhimista doonaya.
 - **Child Tax Credit** - Ilmahuna waa in ay da'diisu ka yartahay 17 sano marka taariikhdu marayso Decenber 31, 2017.
 - **Hadii ilmahu ka way'yahay 19, waxa laga rabaa qofka masuul ka ah ee qaata EITC.** In Ilmahu tago waxbarasho "Full time ah" kana yar 24sano marka taariikhdu marayso Decenber 31, 2017. ama ilmahu yahay qof aanu laxaadkiisu u dhamayn.
- Marka go'aan laga gaadhayo in cashuur dalbaduhu uu xag u leeyahay EITC., wax saamay ah kuma yeelanayso hadii uu Ilmahu yahay mid isagu aan kuwada tiirsanayn cashuur dalbadaha.
- Hadii qof uu doonayo in uu Ilmo ku dalbadu cashuur dhaaf waxa shardi ah in qofka doonayaa taa ay lacagta soo gaashaa ka badan tahay waxa loo yaqaan AGI oo ah Adjusted Gross Income. Tani waxa ay dhacdaa marka Qoyska uu qof ku soo biro.
- Hadii labada qof ee waalid ka ah ayna isu raacsanay qofka xaq u leh in uu Ilmaha ku dalbadu cashuur dhaaf ama cashuur celis. Waxa la eegayaa qofka ilmahu uu la noolaa inta badan sanadkaa. Hadii se uu Ilmahu la noolaa labada waalid wakhti isu mida sanadkaa waxa xaq u yeelanaya labada waalid ka mushaharkiisu badan yahay.



Hadii ay Caruurtu:

1. Aanad la noolay waalid kaa midna,
2. Uu yahay ilama xaqa u yeeshay (qualifying child) ka badnayn mid in ka badan cashuur bixiyaha (more than one taxpayer), iyo
3. cashuur bixiyuhu aanu (the taxpayers can't agree) qofka ilmaha dakhli ku qaadanaya,

kadibna cashuur bixiyaha iyo ka ugu dakhliga sareeya ayaa baa dakhliga qaadanaya.

Qaraabada Xaqa u leh

Qaraabada xaqa u lehe waa qof

- Dhalashada U.S haysta ama ku nool waddanka Maraykanka, kanada ama Meksiko,
- Mid ka mida dadka kula dagani waa in kula noolaayeel muddo sanad ah, ama qof qoyskaaga ka mid ah oo aan kula noolayn sida:
 - caruurtaada, caruurta awowga ama ayayda u tahay, kuwa awow ama ayay labaadka u tahay,
 - walaalkaa, walaashaa, walaalka hooyo ama aabo kula dhalay, walaasha dhinaca aabo ama hooyo,
 - waalidkaa, waalidka waalidkaa, aabaha ama hooyada dhinac ahaan, edo ama adeer, caruurta adeerka ama edo loo yahay ama abtiga iyo babaryarka looyahaya,
 - ninka qaba aabahaa, aayadaa ama gabadha aabahaa qabo, sodogaa, sodohdaa,
 - gabadha walaalka qabo, ninka walaashaa qaba.



Ilmuhu ama qofku sida caadiga ah **ma noqon karaan** hadii ay yihii:

- In ay yihiin xaas iyo ay arji lamaane ahaan ah la qorteen ubadkiisa
- In uu soo galo dakhliga ka badan \$4,050 2017 gudahiisa. **Laakiin**, hadii uu ilmuhu uu ka yaryahay 19 jir ama arday ka yar 24, oo ay wiliba wili kugu xidhanyihiin dakhligooduna uusan ka badnayn \$4,050.

Qaanuunka sare waa kuwa cashuurta federaalka. Minnesota waxay isticmaashaa qaanuuno sidoo kale sida dakhliga istaadka iyo cashuurtaguryaha Waydii qofka cashuurtaada kuu xisaabiya ah.

Ma heli karaa EITC?

EITC waa cashuur loogu talo galay daka shaqeeya. Dakhliga ugu badan waa in uu ahaado \$6,318. Qofka aan xaaska lahayn iyo kuwa xaaska lihiba way qaadan karaan. qasab maaha in aad caruur leedahay, laakiin dakhigaagu waa sii kordhayaa hadii aad caruur leedahay. Qawaaniintu waa sidaas ee caruurta ay wax ku hesho. Eeg hoos. *Hadii aad ku xadgudubto qawaaniintaas, waa laguu diidi karaa EITC oo qaadan maysid muddo ilaa 10 sanadood ah.*

Waa in aad shaqaysay sanadkii 2017. ma qaadan kartid EITC hadii uu dakhligaagu uu dibadda U.S aad ka heshay. Dakhligaagua iyo "dakhligaaga oo dhan" adjusted gross income" formka ama arjiga cashuurtaadu waa in ay ka yaraato:

- \$48,340 hadii aad haysato 3 ama in ka badan oo caruur ah
(ama \$53,930 hadii aad xaastahay iyo si lamaane ahaan u buuxinaysaan foomka)
- \$45,007 hadii aad haysato 2 ama in ka badan oo caruur ah
(ama \$50,597 hadii aad xaastahay iyo si lamaane ahaan u buuxinaysaan foomka)
- \$39,617 hadii aad haysato 1 ama in ka badan oo caruur ah
(ama \$45,207 hadii aad xaastahay iyo si lamaane ahaan u buuxinaysaan foomka)
- \$15,010 hadii aad haysato 0 ama in ka badan oo caruur ah
(ama \$20,600 hadii aad xaastahay iyo si lamaane ahaan u buuxinaysaan foomka)

Ma Buuxiyay Qawaaniinta EITC?

- Waa in aad ahaato qof dhalashada U.S haysta ama dagenayd dhamaan 2017
- Waa in aad haysato nabaka loo yagaano social security number **adiga, cida aad ka masuulka tahay iyo caruurtaadadaba**
- Foomaka aad soo buuxinaysaa waa in uuna noqon"qof xaas ah ku buuxinaya kala joog
- Maalgashigaagu waa in uu ahaado in ka yar \$3,450.
- Ma dalban kartid EITC hadii uu qofkale uu adiga kugu dalbada "ilmaha xaqa u leh gunada"



Ma u Dalaban karaa Ilmo EITC?

Haa, hadii uu ilmahaasi oofsado ama uu gaadho waxa loo yaqaano ama lagu qeexay "qualifying child" ama 'ilmaha xaqa u yeeshay gunada' boga ugu horeeya ee xaqiq raaca waxa lagu muujiyay "qualifying relative" ama 'qaraabada xaqa u lehi' **ma** dalban karaan EITC.

Waa maxay Kuwa laga soo reebay ama An Exemption?

Waxa laga soo reebay (sida kuwa laga reebo) yaree taxable income ama lacagtoodo ka yartahay xaqii cashuurta. Kuwa 2016, cashuurta bixiya ee qaata \$4,050 way ka reebanyihiin iyaga iyo cida ay ka ms'uulka yihiinba (hadii aad lamaane ku buuxinaysaan), iyo \$4,050 laga reebay ilma kasta oo xaq yeeshay ama qaraabada xaqa u leh ee ay ku qaataan.

Ma jiraan Guno kale oo aan dalban karaa?

Waa suurto gal in aad qaadan karto:

- Child Tax Credit
- Child iyo Dependent Care Credit
- Working Family Tax Credit
- K-12 Education Credit

Ka waryaso kuwa cashuuraadkaaga taxes arimahaas oo dhan



***Xogtantani waxay khusaysaa sanad cashuureedka
2017 oo kaliyaata.***

***Dakhilga cashuurta celistu waa in la buuxiyo
kamadambasta 17 ka bisha 4 ee 2018***

Warqadaha kale ee xogta waxaad ka heli kartaa gal www.lawhelpmn.org/LASMfactsheets

Xafiiska Legal Aid ee degaankaaga waxaad ka heli kartaa. www.lawhelpmn.org/resource/legal-aid-offices

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2018 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixii aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**